# Heshiiska Imtixaan Qaadista Meesha Fog La Joogo ee Waalidka/Mas'uulka

Gu' kasta, ardayda Oregon oo dhan ee fasallada 3-aad – 8-aad iyo 11-aad ayaa ka qayb qaata Qiimeynta Gobolka Oregon oo dhan ee (tusaale, maadada Luqadda Ingiriisiga, Xisaabta, iyo Sayniska). Ardayda qaarkood ee K – 12 ayaa sidoo kale ka qayb qaadan doona doona Qiimeynta Aqoonta Luqadda Ingiriisiga (ELPA) ee Oregon. Intaa waxa u dheer, in Oregon siiso ardayda fasallada 3 – 12 fursad ay kaga qayb qaataan Ra'yi-ururinta Horumarinta SEED si ay u bixiyaan jawaab celin ku saabsan khibradooda waxbarasho. Oregon ayaa ugu horreyn u adeegsata in uu caawiyo qoysaska, dugsiyada, degmooyinka, iyo gobolkuba in ay fahmaan oo ay horumariyaan guusha waxbarasho ee ardayga.

Ardayda badankoodu ayaa ka qayb qaata imtixaanadani marka ay joogaan dugsiga. Si kastaba ha ahaatee, si loo bixiyo dabacsanaan dheeraad ah, Waaxda Waxbarashada ee Oregon ayaa u oggolaanaysa degmooyinka fursad loogu talagalay ardayda in ay kaga qayb qaataan marka guriga la joogo ama goobta imtixaan qaadashada meesha fog la joogo oo kale haddii loo baahdo iyada oo ku saleysan waxbarida tacliimeed ee caadiga ah ee ardayga (tusaale, waxbarashada internet-ka ama online-ka).

**(Muddada imtixaan qaadashada meesha fog la joogo: Oregon Statewide Summative Test Schedule)**

Marka imtixaanka la iska qaadayo iyada oo la joogo meel fog, ilmahaagu wuxuu heli doonaa imtixaan qaadaha oo kormeeraya qiimeynta. Imtixaan qaaduhu wuxuu awoodi doonaa in uu ilmahaaga ku caawiyo farriimaha sheekaysiga 'chat'. Waxaan sidoo ku talinaynaa, si la mid ah waxbarashada internet-ka, ee ilmahaagu ka shaqasiiyo fiidiyow/maqalka. Tani waxay u saamaxaysaa imtixaan qaadaha in uu arko oo maqlo ardaygaaga labadadba inta lagu jiro imtixaanka iyo in uu si toos ah ula xiriiro ilmahaaga marka uu u baahan yahay taageero inta lagu jiro imtixaanka. Xiriirka u dhexeeya kormeeraha iyo ardaygaagu waa mid toos ah oo cid kale marin uma yeelan doonto. Maqalka waxa lagu duubaa qaybta hadalka ee loogu talagalay ELPA; fiidiyowga lama duubo.

Si loo hubiyo in natiijada la aqbali karo, ODE waa in ay hubisaa ka qayb qaadashada ardaydu inay sax tahay oo ay ka turjumayso waxbarashada ardayga. Waxaa intaasi dheer, in ODE ay ilaaliso ammaanka iyo asturnaanta dhammaan agabyada imtixaanka. Haddii aad jeclaan lahayn in ilmahaagu kaga qayb qaato guriga ama goobta imtixaan qaadashada meesha fog la joogo oo kale, waxaad leedahay mas'uuliyado dhowr ah. Saxiixida aad saxiixayso heshiiskani, waxaad oggolaatay kuwa soo socda:

- Ma qaadi doono nooc kasta oo sawir ah imtixaanka.
- Kama caawin doono ardaygayga ka jawaabista wax su'aalaha imtixaanka ah.
- Kuma aan qori doono wax kasta ku saabsan imtixaanka, warqad ama si elektaroonik ahaan ah.
- Ma shaacin doono wax agabyada imtixaanka oo sugan, oo ay ku jiraan su'aalaha iyo jawaabaha imtixaanku.
- Waan akhriyay Heshiiska Waalidka/Mas'uulka oo aan dib u eegay Heshiiska Ardayga ee ku yaal dhinaca dambe ee dokumentigan.
- Waxaan fahansanahay in waalidiinta iyo ardayda ku kacda akhlaaq aan wanaagsanay oo la xiriira qiimeynta ee Oregon ay dhici karto in laga qaado tallaabooyin ay ka mid yihiin, balse aanay ku koobnaynin, imtixaanka ardayga aan waxba laga soo qaadayn.
- Waan ku raacsanahay in ay muhiim tahay in ilmahaygu si madax banaan u dhammeystiro dhammaan hawlaha qiimeynta.

---

☐ Ilmahaygu **wuu** ka qayb qaadan doona imtixaan qaadashada meesha fog la joogo. *(Fadlan tilmaan ta la dooranayo ee loogu talagalay goobta imtixaan qaadashada meesha fog la joogo)*

[ ] **Haa, *Fiidiyow iyo Maqal-la hawlgeliyay*** [ ] **Haa, *Kaliya Maqal-la hawlgeliyay***

☐ Ilmahaygu **kama** qayb qaadan doono imtixaan qaadashada meesha fog la joogo oo beddelkaada wuxuu imtixaanka u qaadan si shakhsi ahaan ah.

Magaca Ardayga (oo daabacan) ______________________________________________

Magaca Waalidka/Mas'uulka (oo daabacan) ________________________________________

Saxiixa Waalidka/Mas'uulka ______________________________ Taariikhda _________________

## Heshiiska Waalidka/Mas'uulka

*Isku diyaarinta imtixaan qaadista meesha fog la joogo:*

- Waxaan fiirin doonaa ***Imtixaan Qaadis Wadareedka Meesha Fog La Joogo ee loogu talagalay Waalidiinta: Sida Imtixaan Looga Qaato Koorsada Tababarka Guriga***, ee lagu heli karo galka Ilaha Qaadista Imtixaan Wadareedka Meesha Fog La Joogo ee ku yaala website-ka Waaxda Waxbarashada Oregon ee Imtixaan Qaadista, waanana u hoggaansami doonaa dhammaan xeerarka iyo tilmaamaha lagu bixiyey koorsada tababarka.
- Waxaan fiirin doonaa ***Liiska Hubinta Imtixaan Qaadista Meesha Fog La joogo ee Waalidka Mas'uulka***, ee lagu heli karo galka Soo koobida Ilaha Qaadista Imtixaan Wadareedka Meesha Fog La Joogo ee ku yaala website-ka Waaxda Waxbarashada Oregon ee Imtixaan Qaadista, oo waxaan dhammeystiri doonaa dhammaan hawlaha ku jira Liiska Hubinta.
- Waxaan la xiriiri doonaa dugsiga ilmahayga si aan u hubiyo in tiknoolajiyada arrin khuseysa, oo ah software-ka, iyo browserka sugan ay shaqeynayaan si loogu oggolaado ilmahayga in uu ka qayb qaato imtixaan qaadista meesha fog la joogo.

*Maalinta qaadashada imtixaanka:*

- Waxaan bixin doonaa qol loogu talagalay in ilmahayga imtixaanka ku qaato oo aan wax shanqar ah lahayn, oo u gaar ah, oo iftiin fiican leh.
- Waxaan ku dhiirrigelin doonaa ilmahayga in uu isku dayo intii karaankiisa ah oo u wajaho qiimeynta isaga oo dhinaca wanaagsan wax eegaya.
- Kama caawin doono ilmahaygu in uu ka jawaabo wax su'aalaha ah inta lagu jiro qiimeynta.
- Ma duubi doono ama kama hadli maayo wax kasta oo ay ka kooban tahay qiimeyntu, oo ay ka mid yihiin su'aalaha, qoraalada akhrinta, muuqaal sawir, iyo kala doorashada jawaabaha.
- Kaliya waxaan ilmahayga caawin doonaa haddii ay jiraan dhibaatooyin la qabu aaladda qaadashada imtixaanka iyo/ama aaladda kormeerka, arrimaha la xiriira gelitaanka 'logging into', kulanka dhanka internet-ka, ama arrimaha la xiriira gelitaanka 'logging into' qiimeynta.
- Waxaan adkeyn doonaa in ammaanka waxyaabaha ay ka kooban tahay qiimeyntu la ilaaliyo mar kasta. *(Ma aha in midkoodna in agabka imtixaanka ee dhanka internet-ka nuqul laga sameysto, la sawirto, internet-ka laga sii daayo, la duubto, korka laga xafido, ama dib loo abuuro wax kasta ha ahaadeene.)*
- Waan fahamsanahay imtixaan qaadaha ama kormeeruha, looga baahan yahay in ay wixii isdaba darin dhanka imtixaanka ah u soo sheegaan isku duwaha imtixaanka ee degmada taasi oo keeni karta in uu ansax noqon waayo imtixaanka ilmahayga.

*Qaadashada imtixaanka ka dib:*

- Waxaan raaci doonaa tilmaamaha imtixaan qaadaha si ilmahaygu uga baxo 'log out' imtixaanka.

---

## Heshiiska Ardayga:

*Inta lagu jiro imtixaan qaadashada:*

- Waxaan isku dayi doonaa intii karaankayga ah imtixaanka.
- Kama aqbali doono caawimaad qof kasta oo isku daya in uu iga caawiyo ka jawaabista su'aalaha inta lagu jiro imtixaan qaadashada meesha fog la joogo.
- Ma weydiisan doono qof kale in uu iga caawiyo ka jawaabista ama akhrinta su'aalaha imtixaankan.
- Waan fahamsanahay in ka helista jawaabaha su'aalaha ku saabsan imtixaankani laga helo qof kale aan la oggolayn'waqti kasta inta lagu jiro imtixaanka.
- Waan fahamsanahay in isticmaalka aalad ama agab kasta oo aan loo oggolayn kulanka imtixaanka si loo helo jawaabaha su'aalaha aan la oggolayn.
- Waan ku raacsanahay in aanan nuqul ka sameyn, sawir ka qaadin 'screenshot', ama aanan gelin mid kasta oo ka mid ah su'aalaha ama jawaabaha imtixaanka baraha bulshada.

*Imtixaan qaadashada ka dib:*

Waan ku raacsanahay in aanan cidna ka hadlin ama aanan siinin jawaabaha su'aalaha imtixaankan ku jira.

**Muhiim ayay ii tahay in aan noqdo qof daacad ah oo taasina macnaheedu yahay in DHAMMAAN JAWAABAHA ka tirsan imtixaankaygu ay ka turjumayaan fikirkayga oo aanan caawimaad ka helin dadka kale jawaabahayga.**